IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الدمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 1 Nofembar 1981 L. 11

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiln lambar waliba—RUKUNKA:
waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana
300. Ruknka la weydiisto
bmaa 1
xoo ka yar waa laba Sh. — Rukunka
a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta
ta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska
radda Lacagta.

KOOBNIIN

## QAYBTA KOOW

## SHARCI

SHARCI Lr. 60 ee u rogid Sharci Xeer- Sharciga lamb. 4 ee 30ka Okt. 1981.- BOG. 1611

SHARCI Lr. 61 ee 10 Nof. 1981, Ku fidinta Dalka JDS Sharciga Lamb. 10. ee 17 Dis 1980 Sharciga Dhulka Dhismaha ee Gobolka Banaadir. » 1612

SHARCI Lr. 62 ee 12 Nof. 1981, Xuquuqda Siyaasiyiinta. » 1614

Wakaaladda M. Qaranka

XEER

QAYBTA LABAAD

XEER-SHARCI Lr. 4 ee 30 Okt. 1981, Xeer-Sharci Ded-deg kuna saabsan wax ku keenidda Habka F. V. » 1624

XEER MADAXWEYNAHA JDS, Lr. 56 ee 29 Okt. 1981, Billado Maar ah oo Ka-caannimo Jaalle Yuusuf Sheekh Cali Samantar. » 1626

XEER MADAXWEYNAHA JDS, Lr. 57 ee 29 Okt. 1981, Billado Maar ah oo Ka-caannimo Jaalle Cabdullaahi Jaamac Suudi iyo Cabdi Cawil Jaamac. » 1627

MADAXWEYNAHA JDS, Lr. 58 ee Nof. 1981, Billado Maar ah ee Hawl-Gurmadka Fatahaadda We- » 1628

JDS, Lr. 59 ee Dallacaad. » 1632

Lr.60 Dib u Sicir-Kola ay soo saarto. » 1636

QAYBTA SADDEXAAD

W. M.

TALOOYIN ISGAARSIIN OG. IYO WIXII LA MID AH

# S H A R C I

Sharci lambar 60 taariikh 10 Nof. 1981, U rogid sharci Xeer-sharciga lambar 4 ee 30ka Okt. 1981.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Sharcibaga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay sharci, Xeer-sharciga lambar 4, ee 30ka Oktoobar 1981 oo ku saabsan WAX KU KEENIDDA HABKA Franca Valuta.

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.
Muqdisho, 10 Nof. 1981

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

Sharciga lambar 61 taariikh 10 Nof. 1981, Ku fidin Dalka JDS Sharciga lambar 10 ee 17.12.1980: Sharciga Dhulka Dhismaha ee G. Banaadir.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Sharciga lambar 10 ee 17.12.1980, kuna saabsan Maamulka Dhulka Dhismaha ee Gobolka Banaadir, waxaa lagu fidiyey Gobollada J.D.S. oo dhan.

Qod. 2aad

Wixii ka dambeeya taariikhda uu dhaqan galo Sharcigan, maamulka iyo bixinta dhulka dhismaha, meel kasta ee Jamhuuriyadda ha ahaatee, waxaa Qaranka uga wakiil ah Dawladda Hoose ee Degmooyinka JDS, iyadoo Dawladda Hoose ee kasta ay dhowreyso soohdinta degaankeeda.

Qod. 3aad

1. Dhul kasta oo la bixinayo wuxuu noqonayaa mid ku saleysanjaangooyo guud (TOWN PLANNING) oo hore loo sameeyey, loona oggolaaday.

2. Jaangooyada waa in lagu muujiyaa dhulka loogu talo galay degsiimada, warshadaha, ganacsiga, danaha caamka ah, nabadgelyada iyo hawlaha adeegga ee lagama maarmaanka u ah nolol maalmeedka Bulshada.

3. Jaangooyada Degmo kasta waxaa oggolaanaya Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud.

Qod. 4aad

Il aaiyo inta ay ka helayaan Farsamo-Yaqaanno gaar ah, Dawladaha Hoose waxaa la shaqaynaya Farsamo-yaqaannda Wasaaradda Hawlaha Guud ee Degmada ama Gobolka jooga.

Qod. 5aad

1. Dawladaha Hoose markey dhul saayaan qof, urur, ama hay'ad, waa in nuqul qoraallada dhul bixinta ay u soo diraan Wasaaradda H.G., si loo geliyo Diiwaanka guud (catasta), laguna xannaaneeyo.

2. Wasaaradda H.G. waxay u xilsaaran tahay Qaruurinta iyo diiwaangelinta dhulka dhismaha ee Qaranka oo dhan.

Qod. 6aad

Wasaaradda H. G. waxay ku kormeereysaa Dawladaha Hoose fulinta jaangooyada degaanka, waxayna awood u leedahay in ay joojiso dhul kasta oo lagu baxshay si khilaafsan jaangooyada magaalada.

Qod. 7aad

Waxaa Dawladaha Hoose ka reeban in ay bixiyaan dhulalka xeebaha, kuwa beeraha, daaqa iyo meelaha macdanta laga qodo oo shuruuc gaar ah lagu maamulo.

Qod. 8aad

Sharci kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin Sharcigan waa la buriyey.

Qod. 9aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho; 10 Nof. 1981

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI LAMBAR 62, Taariikh 12 Nov 1981
Xuquuqda Siyaasiyiinta.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

(Qiimeynta Hawlaha Siyaasiga)

1. Siyaasaddu waa aqoonta iyo Farsamada Xeesha dheer Hoggaaminta nafhurinimada leh ee Halganka Ummadda, ujeeddadeeduna waxay tahay u hawlgalka badbaadinta jiritaanka Umadda iyo xiqiijinta horumarkeeda dhanka dhaqaalaha, Siyaasadeed, dhaqanka iyo aqoonta, u adeegidda midnimada Ummadda iyo habeynta iskaashiga iyo wax wada qabsiga Ummadaha Adduunweynaha.

2. Sidaas Darteed, hawsha Siyaasigu waxaa weeye xilka iyo hawsha ugu qaayo weyn ee Qaranka loo hayo, lana xiriira dejinta istaraatejiyada Guud ee Siyaasadda Dalka, sharci dejinta iyo hoggaaminta Maamulka Sare ee Qaranka.

Qodobka 2aad

(Micneyn)

1. Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo loo aqoonsan yahay in ay yihiin Siyaasiyiinta Koowaad ee Qaranka ka sokow, Siyaasi Wuxuu kaloo Sharcigan ulaJeedaa:

a) Qof kasta oo Dalka ka haya ama horey uga qabtay, laga billaabo 21ka Oktoobar 1969, Xil Siyaasadeed oo leh dabeecadda ku tilmaaman

1. Abaabulayaasha Kacaanka;
2. Xubnaha Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;
3. Xubnaha Galaha Wasiirrada iyo
4. Xildhibaannada Golaha Shacbiga.

b) Sidoo kala Siyaasi waxaa loo aqoonsan yahay Xoghayayaashii Dawladda, ka hor intaan la aasaasin Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

2. Marka laga hadlayo Sharcigan, Abaabulayaasha Kacaanka 21ka Oktoobar 1969 waxaa loola jeedaa Xubnihii Golaha Sare ee Kacaanka.

## Qodobka 3aad

(Xuquuqda Siyaasiga)

Siyaasiga ku tilmaaman Qod. 2 ee Sharcigan, Wuxuu yeelanayaa, inta uu xilka hayo, Mushaarada ama Gunnada Sharciyada gaarka ahi tilmaameen ka sokow, Xuquuqda soo socota:

a) Guri Dawladeed oo uu kiradiisa iska bixiyo, isagoo la siinayo mudnaanta Koowaad:

b) In uu Shaqada ka nasto 45 Maalmood Sannadkiiba;

t) Kharajka Jiifka Isbitaallada iyo Daaweynta isaga iyo Xaaskiisa oo laga bixiyo:

j) Qiimaha tikidhada Gaadiidka Dawladda ee dhulka, Badda iyo Cirka ee Kirada lagu raaco oo laga dhimo Boqolkiiba Soddon (30%), marka Kirada isagu iska bixinaayo:

x) In uu kiro la'aan ku raaco Gaadiidka kale ee Dawladda, marka ay suurtagal tahay, isagoo la siinayo mudnaan Gaar ah.

Qodobka 4aad

(Hawl-gabka iyo Liil-tirka)

Siyaasigu marka ay muddada uu xilka hayo u dham maato, ama uu gudan kari waayo xilka, Geeri, Jirro, gabow ama rabid awgeed, wuxuu xaq u yeelanayaa, isaga ama dhaxlayaashiisu, hawlgabka ama Liiltirka ku sheegan qodobbada hoose ee Sharcigan.

Wixii uusan Sharcigaani ka hadlin, waxaa loo raacayaa Sharciyada Hawlgabka iyo Liiltirka ee Shaqaalaha Rayadka ah ee Dawladda, ama Ciidamada Qalabka Sida, iyadoo la fiirinayo hadba Hay'adda uu Siyaasigu ka tirsanaan jiray.

Qodobka 5aad

(Shuruudaha Hawlgabka)

1. Xaqa Hawlgabka ee Sharcigan ku tilmaaman waxaa lagu muteysanayaa:
   a) In uu Siyaasigu ka mid yahay Abaabulayaasha Kacaanka, ama:
   b) In Toban Sano uu hayay Xil Siyaasadeed oo xiriir ah, ama:
   t) In sabab shaqada ku lug leh uu ku Geeriyooday ama ay ku soo gaartay naafo buuxda oo joogta ah oo awoodiisa shaqo qabad wax yeeshay.

Naafada kor ku tilmaaman waa in ay noqotaa mid wax u dhintay dhammeystirnaanta Qofka xagga jirka ama maskaxda.

Qodobka 6aad

(Shuruudaha Liiltirka)

1. Xaqa Liiltirka ee Sharcigan ku tilmaaman waxaa lagu mutaysanayaa muddo toban Sano ka yar hadii Siyaasiga uu kaga baxo hawsha Siyaasadda, sabab kasta ha ka dambeysee, marka laga reebo xaa-

ladaha ku cad Xubnta Koowaad, xaraka (t) ee Qodobka hore, ama Shaqada uu ikhtiyaarkii uga istiqaaloodo, isagoon dhammeysan ugu yaraan shan Sano oo Xiriir ah.

2. Dhanka Liiltirka, Sannad kasta oo Siyaasigu hayey hawl Siyaasadeed waxay u dhigantaa laba Sano oo hawl Caadi ah.

Qodobka 7aad

(Dooransiin)

1. Siyaasiga ay hawsha Siyaasaddu u dhammaato, iya doo la tixgelinaayo hadba rabiddiisa iyo danta Maamulka, Qaranku wuxuu u xilsaari karaa, haddii uusan gaarin da'da hawlgabka ee Shaqaalaha Dawladda, hawlo kale oo caadi ah, waxaana lagu dhaqayaa nidaamka soo socda:

a) haddii uu yahay qof hawlgab Siyaasinimo gaaray, ku xaq siintiisa Sharcigan dib ayaa loo dhigayaa ilaa iyo inta uu hayo shaqada kale ee Qaranka ee uu doortay, marka uu shaqada ka fariistana waxa uu qaadanayaa hawlgabka Siyaasiga:

b) haddii uu yahay qof Liiltir ku goostay Sharcigan, wuxuu xaq u yeelanayaa in uu kala doorto

1. In muddada uu Siyaasinimada ku shaqeeyey loogu daro midda shaqada caadiga ah iyadoo Sannadkii ba laba Sanno loo xisaabinayo, xaqsiintiisana waxaa la waafajinayaa Sharciga hay'adda uu ku biira amma:

ii) In uu qaato liiltir mar keli ah oo ku saleysan muddadii uu Siyaasigu ahaa. Xaaladdan dambe, inta uu siyaasinimada ku shaqeeyey, liil-

tirkeedana uu qaatay, lagu tirin maayo muddada hawlgabka shaqaalenimo.

2. Siyaasiga u ssaqeeyey Qaranka muddo ka badan muddada uu hawlgabka siyaasinimo ku helay, wuxuu xaq u yeelanayaa, hawlgabka Sharcigu u oggol yahay ka sokow, liiltir bil mushaaradeed ah sannad kasta oo dheeraad ah.

3. Hawisha siyaasadda ee ka badan 15 sano, ma keeneyso kororsiimada liiltirka ku sheegan xubinta hore ee Qodobkan.

Qod. 8aad

( Xuquuqda hawlgabka X. G. XHKS iyo Madax'naha )

Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo Madaxweynaha JDS, marka ay muddadu u dhammaato, ama ay gudan kari waayaan xilkooda, sababaha ku xusan Qod. 4, xubinta Koowaad, awgood waxay yeelanayaan xuquuqda soo

a) gunnadii ay qaadan jireen inta ay xilka hayeen, haddii ay geeriyoodaanna waxaa hawlgabkooda yeelanaya dhaxlayaashooda, sida Sharcigan uu dhigayo.

b) guri dawladeed in la siiyo, haddii ay geeriyoodaanna carruurta iyo afada, ilaa iyo inta muddada hawlgabku u socoto, sida ku cad Qod. 11 ee Sharcigan;

t) Gaadiid Dawladeed, muddada hawlgabku socdo.

j) Bursiinooyinka ku tilmaaman Qod. 10 ee Sharcigan, marka laga reebo midda ku cad Xubinta Koowaad, xarafka (a) ee isla Qodobkaas.

Qodobka 9aad

(Gunnada hawlgabka Siyaasiyiinta kale iyo Liiltirka).

1. Hawlgabka iyo Liiltirka Siyaasiyiinta kale waxaa looga qiyaas qaadanayaa Mushaarka iyo gunnooyinka derejada A/l, waxaana qayb walba oo Siyaa siyiinta ka mid ah laga siinayaa inta soo socota:

 1) Abaabulayaasha Kacaanka: 100%;

 11) Xubnaha Golaha Dhexe ee XHKS: 90%;

 III) Xildhibaannada Golaha Shacbiga iyo Xubnaha Golaha Wasiirrada oo aan ku jirin labada Gole ee hore (I) iyo (II) 80%

2. Qofka Siyaasiga ah ee qaybaha Siyaasiyiintu kala yihiin ee kor ku sheegan mid wax ka badan soo ma ra, waxaa lagu xaqsiinayaa qaybta ay Tobanka sano ugu dhammaatay, ama midda uu shaqada uga tegay, hadba tii u faa'iido roon, marka laga reebo Abaabulayaasha Kacaanka oo mar walba lagu xaq siinayo boqolkiiba boqol (100%).

3. Qofkii shaqaale ahaa ee Siyaasi noqday oo aanan dhammaysan muddada hawlgabka Siyaasinimo ee Sharcigan sheegayo, muddadii uu shaqaalanimada ku soo shaqeeyey iyo midda Siyaasadda, oo Sannadkiiba looga soo qabanayo laba Sanno, marka la isku daro haddii hawlgab shaqaalanimo uu ku muteysanayo, wuxuu Xuquuqdiisa hawlgabka ku qaa danayaa darejada A/2 ee Shaqaalaha Dawladda, haddii darejo ka sarreysa aanu gaarin, waxaana lagu xaqsiinayaa Sharciga Shaqaalaha Dawladda.

## Qodobka 10aad

(Bursiino dheeraad ah)

1. Abaabulayaasha Kacaanka iyo Siyaasiga hawl Siyaasadeed hayey ugu yaraan 15 Sanno oo xiriir ah, waxa ay xaq u yeelanayaan, hawlgabka ka sokow, bursiinooyinka soo socda:

   a) In la siiyo Guri Dawladeed, markay suurtagal tahay, Ijaarkana laga dhimo boqolkiiba konton (50%);

   b) In Jiifka Huteellada Dawladda iyo Hay'adaheeda laga dhimo boqolkiiba konton (50%);

   t) In tikidhada Gaadiidka Dawladda ee dhulka, Badda iyo Cirka ee Kirada lagu raaco, laga dhimo boqolkiiba konton (50%);

   j) In uu kiro la'aan ku raaco Gaadiidka kale ee Dawladda, markay suurtagal tahay, mudnaan na lasiiyo;

   x) In lagu martiqaado xafladaha munaasabadaha waaweyn ee Qaranka, mudnaanna la siiyo, iyagoo Borotokolka ka gelaya xilkii Siyaasadeed ee ay hawlgabka ku qaateen;

   kh) In ay ku dhoofaan Baasaboor dibloomaasi ah

   d) In marka ay Geeriyoodaan lagu maamuso aas id Dawli ah, Kharajkana ay bixiso Dawladdu.

## Qodobka 11aad

(Dhaxalka xaqa hawlgabka)

1. Siyaasiga Sharcigan hawlgabka ku muteystay, marka uu geeriyoodo, dhaxlayaashiisu waxay hawlgabka u qaadanayaan sida hoos ku tilmaaman.

2. Caruurtu waxay hawlgabka qaadanayaan ilaa mi-

3. Haddii Caruurtu shaqo Lacag ka soo gashaa ayan lahayn, ama dakhli kale, Dugsina dhigtaan, hawlgabka wuxuu u soconayaa ilaa ay ka gaaraan 21 Sanno.

4. Dhaxlayaasha kor ku sheegan waxaa ka mid noqonaya, laga billaabo maalinta ay dhashaan, ilmaha uurka hooyada jiifay marka Siyaasigu uu geeriyooday, Xaddidaadda waqtiga ilmuhu galeen uurka hooyada waxaa loo cuskanayaa Xeerka Qoyska.

5. Haddii Siyaasigu ka tegay ilmo Curyaan ah, hay'ad ama cid kaloo xannaanaysana ayna jirin, dakhli kalena uusan lehayn, waxaa xannaanadiisa kafaala qaadeysa Dawladda.

6. Haddii ayna Caruur jirin, Afadu waxay qaadanaysaa qaybta ku soo aadan, sida uu qabo Xeerka Qoysku, ilaa ay ka geeriyooto ama ka guursato. Sidoo kale xaqaas Afadu waxay yeelanaysaa marka ayan la noolaan Caruurta.

7. Afadu marka ay guursato, waxaa la siinayaa Lacag u dhiganta qaybta ay ku leedahay gunnada hawlgabka oo shan Sanno ah.

8. Qofka wax dhaxlayaa marka uu yahay Ninku, wuxuu hawlgabku yeelanayaa marka ayan Caruur jirin, awooddiisa wax qabadna ay ka hooseyso boqolkiiba Soddon, isagoo qaadanaya qaybta hawlgabka uga soo aada sida uu qabo Xeerka Qoysku.

9. Marka la waayo xaaladaha ku tilmaaman xubnaha hore ee qodobkan, ninka iyo labada waalid waxay xaq u yeelanayaan lacag mar keliya ah oo u dhiganta qiimaha toban sano oo liiltir siyaasinimo ah.

10. Waxaa reebban qoys inuu qaato laba hawlgab oo siyaasinimo ah.

Qod. 12aad

(Dhaxalka xaqa liiltirka)

Xaqa liiltirka Siyaasiga geeriyooda waxaa qaadanaya Dhaxlayaashiisa, waxaana lagu dhaqayaa Sharci-

Qod. 13aad

(Lumidda xuquuqda hawlgabka iyo liiltirka)

Xuquuqda Sharcigani uu siiyey Siyaasiga waxay ka lumeys aahaddii uu ku caddaado dembi lid ku ah Qaranka, nidaamkiisa dawladnimo, ama dembi khatar gelinaya midnimada, madaxbannaanida iyo nabadgelyada Qaranka, ama xukun maxkamadeed oo kma dambeys ah uu ku sugo dembi ka mid ah dembiyada ku tilmaaman Qod. 76aad, xubintiisa koowaad, xarafka ( e ) ee Sharciga Shaqaalaha Dawladda (Sharci lambar 5 ee 2dii febraayo 1980).

Qod. 14aad

( Nafaqada Qoyska Garsugaha )

1. Siyaasigu inta uu Garsuge yahay, waxaa xaaska iyo carruurtiisa la siinayaa laba meelood meel mushaarkii iyo gunnadii uu qaadan jiray.
2. Xaaladda garsugenimada waxay soconeysaa ilaa uu ka soo baxo go'aan kama dambeys ah.

Qod.15aad

( Bursiinooyin aan kulmi karin )

Haddii isla xuquuqda ku tilmaaman Qod. 3aad ee Sharcigan iyo bursiinooyinka lagu soo xusay Qod. 10aad kuwa la mid ah ama la dabeecad ah Siyaasigu uu shuruuc kale ku mutaysto, waxaa laga soo qabanayaa mid keliya· waxayna noqoneysaa midda u faa'iido badan·

Qod. 16aad

(Joojin ku xaq siin habab hore)

1. Laga billaabo 1da Jennaayo 1982, Siyaasiyiinta ama dhaxlayaasha Siyaasiyiinta ee hawlgabka ku qaata habab ka duwan kuwa Sharcigan ku tilmaaman, waxay ku xaq qaadanayaan Sharcigan.
2. Hase yeeshee haddii habka uu u faa'iido roon ya-

Qod. 17aad

(Xeer-nidaamiye)

Madaxweynaha JDS, isagoo dhegeystay soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, wuxuu xeer ku soo saarayaa Xeer-nidaamiye lagu fulinayo Sharcigan.

Qod. 18aad

( B u r r i n )

Sharci kasta iyo xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan waa la baabi'iyey.

Qod. 19aad

( Dhaqangal )

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood kadib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 12 Nof. 1981

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

# X E E R

Xeer-Sharci Lr. 4 ee 30 Okt. 1981, Deg-deg kuna saabsan Wax ku Keenidda Habka F. V.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 69 ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 12 ee 26.9.64 kuna saabsan Ganacsiga Dibedda;

ISAGOO ARKAY. Sharci Lr. 5 ee 11.12.68 kuna saabsan Tacriifada Furdada;

ISAGOO TIXGELINAYA: go'aannadii horay ay Golayaasha ka gaareen dhibaatada uu la taagan yahay habka FrankoFaluuta loona baahan yahay in tillaabo sharci ah lag qaado;

IYADOO UU SOO JEEDIYAY: Wasiirka W. Maaliyadda;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Golaha Wasiiradda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-Sharcigan:

## Qod. 1aad

Wax allaale wixii Badeecooyin ah ee Furdadaha Dalka ku sugan kuna soo galay ama kusoo geli doona habka Franka Faluuta ilaa taariikhda 15 Nofembar 1981 waa in la canshuuraa, laguna dabbaqaa ganaax u dhigma hal mar canshuurta ku waajibtay badeecad kasta ee ilaa taariikhdaas soo gasha Dalka.

## Qod. 2aad

Badeecadii Dalka ku soo gasha Habka Franka Faluuta taariikhda ku xusan Qod. 1aad ka dib waa laga hantiguurinayaa (Shall be confiscated) ciddii keenta, waxaana loo xilsaaray Wasaaradda Maaliyadda inay alaabtaas ku xaraashto furdadda dhexdeeda iyadoo la-

Qod. 3aad

Alaabta la socota qofka soo gelaya (Personal effects) waxaa loo raacayaa Qod. 20aad ee tacriifada furdada.

Wixii qofka u keensaday in uu khaas ahaan u isticmaalo (Personal use) ee aan ganacsi loola jeedin waa loo canshuurayaa.

WUXUU SOO SAARAYAA

Qod. 4aad

Wixii aan daruuri ahayn (Non essential items) oo Bankiga Dhexe u furi waayo isticmaad (L/C) Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo kan Ganacsiga kadib markay dersaan awood ayey u leeyihiin in ay fasaxaan in Franka Faluuta lagu keeno.

Qod. 5aad

Waa la burriyey sharci kasta ee kan ka soo horjeeda ama aan la soco nkarin.

Qod. 6aad

Xeer-Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waana in loo gudbiyaa Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga, si loo rasmiyeeyo.

Waa ku khasab cid kasta inay u hoggaansanto Sharcigan una hoggaamiso qof kasta.

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 56 ee 29 Okt. 1981

Billad Maar ah oo Kacaannimo: Jaalle Yuusuf Sheekh Cali Samantar.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. 65 ee 10 Okt. 1970;

AARKUU TIXGELIYEY: Halganka dheer ee Jaalle Yuusuf Sheekh Cali Samantar uu ku soo maray qii meyn gaar ahna siiyey wax qabadkiisa, kartidiisa iyo sidahad iyo goor uu ugu dadaalay midnimada iyo sare u qaadidda wacyiga siyaasadda iyo baahinta suugaanta Soomaaliyeed;

MARKUU TIXGELIYEY: in aylaga ma maarmaan tahay in aqoonsiga uu mudan yahay la sooyo, raad dhaxal gal ahna looga reebo halgankiisa xaqa ah, taariikhiga ah;

MARKUU DHEGEYSTAY: Talada Guddiga Abaalmarinta 10-Guurada Kacaanka.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Waxaa lagu maamusay BILLAD MAAR AH OO KACAANNIMO Jaalle Yuusuf Sh. Cali Samantar.

Muqdisho, 29 Okt. 1981

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, Lr. 57 ee 29 Okt. 1981

Billado Maar Kacaannimo: Jaalle Cabdullaahi Jaamac Suudi iyo Jaalle Cabdi Cawil Jaamac.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. 65 ee 19 Okt. 1970;

MARKUU TIXGELIYEY: Halganka dheer ee Jaalle Cabdullaahi Jaamac Suudi iyo Jaalle Cabdi Cawil Jaamac ay soo mareen, qiimeyn gaar ahna siiyey wax qabadkooda iyo kartida ay leeyihiin iyo sida had iyo goor ay ugu dadaalayaan midnimada iyo sare u qaadidda horumarinta Bulshada Soomaaliyeed;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in aqoonsiga ay mudan yihiin la siiyo, raad dhaxal gal ahna looga reebo halgankooda xaqa ah, taariikhiga ah;

MARKUU DHEGEYSTAY: Talada Guddiga Abaalmarinta Qaranka.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. Keliya

Waxaa lagu maamuusay BILLAD MAR AH OO KACIINNIMO AH, Jaallayaasha:

1. Cabdul'hi Jaamac Suudi G/Tog.-Deg. Burco
2. Cabdi Cawil Jaamac G/Tog.-Deg. Burco

Muqdisho, 29 Okt. 1981

MADAXWEYNAHA JDS

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 58 EE

12 Nof. 1981 Billado Maar ah oo Hawlkarnimo: Gurmadkii Fatahaadda Webiyada iyo Roobabkii.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka:
MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 65 ee 19 Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY: Warbixinta Guddiga Qaranka ee Gurmadka Fatahaadda Webiyada iyo Roobabka ee Gugii dhoweyd;

MARKUU TIXGELIYEY: Xooggagii tiirarka u noqday shaqadii Gurmadka ka hortaagga dhibaatooyinka Fatahaadda, kuna muujiyey xilkasnimo, karti hawlkarnimo, daacadnimo iyo dadaal dheeraad ah, iyagoo u adeegaya himilada Kacaanka iyo horumarinta Qaranka;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in aqoonsi dhaxalgalka ah loo reebo Xooggaggaas nafhuridda iyo kalsamida ku shaqeeyey kuna gutay halganka xaqa ah ee midnimada ummadda Soomaaliyeed loogu jiho;

MARKUU DHEGEYSTAY: Talada Guddiga Abaalmarinta Qaranka;

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa lagu maamusayaa Billado Maar ah oo Hawlkarnimo Jaallayaasha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin:

1. G/le Sare Maxamed Cige Cilmi Xoghaye G/X/Gobolka J/Hoose;

3. L/X/le Yuusuf Axmed Maxamed Xog. Degmada Jammaame;
4. Cabdi GeelleBulxan Duqa Magaalada Jammaame J/Hoose
5. L/X/le Maxamed Aadan Taliyaha Sal. Bol. Jammaame J/Hoose
6. Muxudiin Siyaad Raage Isuduwaha W/Beeraha J/Hoose
7. Xuseen Axmed Maxamed Isuduwaha Onat J/Hoo.
8. Guhaad Cismaan Muudey Dadweyne Deg. Jamame J/Hoose
9. G/Sare Saciid Cali Baalle Xoghaye hore G/Hiiraan
10. Axmed Gurxan Muuse Isuduwaha W/H/Guud G.H
11. Maxamed Cali Xaaji Isuduwaha Onat G/Hiiraan
12. Xuseen Xasan Maxamed Wasaaradda Gaadiidka Gobolka Hiiraan
13. G/le Shire Maxamed Cuke Xoghaye Deg. B.Weyne Gobolka Hiiraan
14. Khaliif Sheekh Yuusuf Duqa Magaalada B. weyne Gobolka Hiiraan
15. Dhamme Axmed Cali Maxamed Xoghaye Deg. B. Burte Gobolka Hiiraan
16. Maxamed Cusmaan Cabdi Duqa Magaalada B. Burte Gobolka Hiiraan
17. L/X/le Sulaymaan Jaamac Magan Xog. Deg. Jalalaqsi Gobolka Hiiraan
18. Sh. Rashiid Xaaji Axmed Daahir Duqa Magaalada Jalalaqsi Gobolka Hiiraan
19. Maxamed Nuur Jiile Kaaliye 2aad Go. Hiiraan
20. G/Sare Xasan Abshir Faarax Xoghaye Gobol Sh. Dhexe

22. Dr. Abiikar Cismaan Abiikar Isuduwaha W/Beeraha Sh. Dhexe

23. Maxamed Cabdi Ibraahim Duqa Magaalada Jawhar Sh. Dhexe

24. Cali Sheekh Axmed Guddiga Joogtada Degmada Sh. Dhexe

25. Dhamme Daahir Cusmaan Sabriye Taliyaha CGU Gobolka Sh. Dhexe

26. Axmed Weyrax Maxamuud Isuduwaha H/Guud Gobolka Sh. Dhexe

27. L/X/le Khaliif Maxamed Warsame Xog. Degmada W/weyn Sh. Hoose

28. G/Dhexe Cabdulqaadir Sheekh Cali C. Qalabka Sida Sh. Hoose

29. G/le Cabdulcasiis Maxamed Ugaas C. Qalabka Sida Sh. Hoose

30. Maxamed Cabdi Cumar Kaaliye 1aad W/weyn Sh. Hoose

31. Maxamed Sheekh Cusmaan Duqa Magaalada W/yn Sh. Hoose

32. Xirsi Cabdulle Xirsi Ag. Guud W.D/Hoose iyo H.R.M.

33. Daahir Xaaji Cusmaan Maareeyaha Guud Wak. B. Ummadda

34. Dr. Cali Maxamed Xasan K/S Agaasimaha Guud W.H. Guud

35. G/Sare Faarax Maxamed Jaamac M/Guud W. Gaadiidka Qaranka

36. G/Sare Nuur Xasan Xuseen Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed

37. Dhamme Nuur Kulane Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed

38. Maxamed Jaamac Xasan Wasaariyadda Maaliyada

39. Shariif Axmed Maxamed Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marku uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12 Nov. 1981

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(S/Gaas MAXAMED SIYAAD BARRE)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L.59 EE
17 Okt. 1981 Dallacaad.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobka 82aad

MARKUU ARKAY: Sharciga Lamb: 2 ee 23:12.1972 oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Ta liyaha Ciidanka Boliiska kuna qoran Xaashidiisa Lambar Xog/A/8/1.81 ee 17.10.81.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

In Saraakiisha iyo Kormeerayaasha ee ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed ee hoos ku qoran loo Dallacsiiyo derajada midkasta magaciisa ku hor qoran, marka laga bilaabo 16.10.1981:

1. Dhamme Ismaaciil Baaruud Maxamed -Gaashaale
2. Dhamme Cabduqaadir Muuse Maxamed - Gaa/le
3. Dhamme Nuur Muuse Cali - Gaashaanle
4. Dhamme Xaas Khaliif Mahdi - Gaashaanle
5. Dhamme Maxamed Shire Warsame - Gaashaanle
6. Dhamme Cilmi Xirsi Cali - Gaashaanle
7. L/Xiddigle Ismaaciil Saalax Sugulle - Dhamme
8. L/Xiddigle Cabdiwaaxid Axmed Cabdiraxmaan - Dhamme
9. L/Xiddigle Cabdulle Cali Calasow - Dhamme
10. Xiddigle Cabdi Galaal Caddow - L/Xiddigle
11. K/S.5544 Axmed Jaamac Ibraahim - Xiddigle
12. K/S.2217 Yuusuf Sheekh Maxamuud Cabdulle X/le

Qodobka 2aad

Xeerkani deg deg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 17.10.1981.

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
— MADAXWEYNAHA J.D.S. —

Waan aragnay ee Diiwaangelinay;

Diiwaanka L. 7 Bogga L. 89;

Muqdisho, 8 Okt. 1981;

Hantidhowraha Guud;

Dr. Xuseen Cabdulle Cali.

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 58 ee 12 Nof. 1981,

BILLADO MAAR AH OO HAWLKARNIMO: GURMAD KII FATAHAADDA WEBIYADA IYO ROOBABKA

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka;
MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 65 ee 19 Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY: Warbixinta Guddiga Qaranka ee Gurmadka Fatahaadda Webiyada iyo Roobabka ee Gugii dhoweyd;

MARKUU TIXGELIYEY: Xooggagii tiirarka u noqday Shaqadii Gurmadka ka hortagga dhibaatooyinka Fathaadda, kuna muujiyey Xilkasnimo, karti, hawlkarnimo, daacadnimo iyo dadaal dheeraad ah, iyagoo u adeegaya himilada Kacaanka iyo horuma rinta Qaranka;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in aqoonsi dhaxalgal ah loo reebo Xooggaggaas nafhuridda iyo kalsamida ku shaqeeyey kuna gutay alganka xaqa ah ee midnimada Ummadda Soomaaliyeed loogu jiro;

MARKUU DHEGEYSTAY: Talada Guddiga Abaalmarinta Qaranka;

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka Soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa lagu maamusay Billado Maar ah oo Hawlkarnimo Jaallayaasha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin:

1. G/leSare Maxamed Cige Cilmi Xoghaye G/X/Gobolka J/Hoose;
2. G/Dhexe Maxamed Xuseen Xirsi Taliyaha Qaybta Boliiska Gobolka;
3. L/X/le Yuusuf Axmed Maxamed Xog. Deg. Ta/mo

5. L/X/le Maxamed Aadan Taliyaha Sal. Boliiska Jammaame J/Hoose
6. Muxudiin Siyaad Raage Isuduwaha W/Beeraha J/Hoose
7. Xuseen Axmed Maxamed Isuduwaha Onat J/Hoose
8. Guhaad Cismaan Muudeey Dadweynaha Deg. Jammaame J/Hoose
9. G/Sare Saciid Cali Baalle Xoghayaha hore G/Hiira
10. Axmed Gurxan Muuse Isuduwaha W/H/Guud G.H
11. Maxamed Cali Xaaji Isuduwaha Onat G. Hiiraan.
12. Xuseen Xasan Maxamed Wasaaradda Gaadiidka Gobolka Hiiraan.
13. G/le Shire Maxamed Cuke Xoghayaha Deg. B. Weyne Gobolka Hiiraan.
14. Khaliif Sheekh Yuusuf Duqa Magaalada B/Weyne Gobolka Hiiraan
15. Dhamme Axmed Cali Maxamed Xoghayaha Deg. B. Burte Gobolka Hiiraan
16. Maxamed Cusmaan Cabdi Duqa Magaalada B. Burte Gobolka Hiiraan.
17. L/X/le Suleymaan Jaamac Magan Xog. Deg. Jalalaqsi Gobolka Hiiraan.
18. Sh. Rashiid Xaaji Axmed Daahir Duqa Magaalada Jalalaqsi Gobolka Hiiraan.
19. Maxamed Nuur Jiile Kaaliye 2aad G. Hiiraan.
20. G/Sare Xasan Abshir Faarax Xoghaye G. Sh. dhex.
21. Dr. Aadan Maxamed Kulane Kaaliye 1aad G. Sh dhe
22. Dr. Abiikar Cusmaan Abiikar Isuduwaha W/Beeraha Shabeelada Dhexe
23. Maxamed Cabdi Ibraahim Duqa Magaalada Jawhar Shabeelada Dhexe
24. Cali Sheekh Axmed G. Joogtada Deg. Sh. Dhexe
25. Dhamme Daahir Cusmaan Sabriye Taliyaha CGU.

26. Axmed Weyrax Maxamuud Isuduwaha H/Guud Gobolka Sh.. Dhexe

27. L/X/le Khaliif Maxamed Warsame Xog. Deg. W/weyn Sh. Hoose

28. G/Dhexe Cabduqaadir Sheekh Cali C. Qalabka Sida Sh. Hoose

29. G/le Cabducasiis Maxamed Ugaas C. Qalabka Sida Sh. Hoose

30. Maxamed Cabdi Cumar Kaaliye 1aad W/weyn Sh. Hoose

31. Maxamed Sheekh Cusmaan Duqa Magaalada W/weyn Sh. Hoose

32. Xirsi Cabdulle Xirsi AG. Guud W/D/Hoose iyo H.R.M. Sh. Hoose

33. Daahir Xaaji Cismaan Maareeyaha Guud Wak. B. Ummadda Sh. Hoose

34. Dr Cali Maxamed Xasan K/S Agaasimaha Guud W.H. Guud Sh. Hoose

35. G/Sare Faarax Maxamed Jaamac M/Guud W.Gaadiidka Qaranka Sh. Hoose

36. G/Sare Nuur Xasan Xuseen Ciidanka Booliska Soomaaliyeed Sh. Hoose

37. Dhamme Nuur Kullane Ciidanka Booliska Soomaaliyeed Sh. Hoose

38. Maxamed Jaamac Xasan Wasaariyadda Maaliyadda Sh. Hoose

39. Shariif Axmed Maxamed Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta Sh. Hoose

Qodobka 2aad

Xeerkani Wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Wayaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12 Nov. 1981

MADAXWEYNAHA J.D.S.

XEER WASARADDA GANACSI. Lr. 60 ee 28 Okt. 1981,

Dib u Habeynta Sicirka Sharaabka Warshadda Koka Kola ay soo saarto.

WASIIRKA WASAARADDA GANACSIGA

ISAGOO ARKAY: Qod. 113aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. yahay 316 ee Maamulka dhexe ee Dawladda soona baxay 17kii Disembar 1962;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. yahay 17 ee soo baxay 21.4.1974, kuna saabsan ilaalinta Ascaarta waxyaabaha lagama maarmaanka ah;

ISAGOO AY UGU MUUQATAY: Lagama maarmaannimada kordhinta Ascaarta Sharaabka ay soo saarto Warshadda Kooka Koola, sida (Koko kola dhalo yar, OZ8, dhalo weyn ah OZ10, Faanta Isbarayt), maadaama la kordhiyay sicirka Sarifka Lacagaha Qalaad ee suuqa Labaad, isla mar ahaanna canshuurta korodhay, lana tixgeliyey qiime dhisaalka ay soo sameeyeen Maamulka Koka Kola.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

QIIMAHA SANDUUQIIBA:

| Kh.Wax soo saarka | | Sanduuq | Dh.Yar | Sanquud | Dh. W. |
|---|---|---|---|---|---|
| | Shs. | 65/28 | 2,72 | 84/96 | 3,54 |
| C/D/Dhexe | » | 15/60 | 0,65 | 15/60 | 0,65 |
| C/D/Hoose | » | 1/20 | 0,05 | 1/20 | 0,05 |
| C. Moorka | » | 2/00 | 0,08 | 4/00 | 0,16 |
| Khid. D/Weynaha | » | 12/00 | 0,05 | 14/40 | 0,60 |

1. Qiimaha Sanduuqa (24 Dh.) Dhalooyinka Yar Yar: OZ8, Sh. So. 96/08;
   Qiimaha Dhaladii Sh. So. 4/=.

2. Qiimaha Sanduuqa (24 Dh.) Dhalooyinka Waaweyn: OZ 10, Sh. So. 120/16;
   Qiimaha Dhaladii ah OZ 10, Sh. So. 5/=.

Qod. 2aad

Xeerkani wuxuu beddelay Xeerkii Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga ee Sum. ahayd WG/W/19-1861/80, wuxuuna dhaqan galayaa laga billaabo 1da Nof. 1981.

Muqdisho, 28.10.1981

WASIIRKA W. GANACSIGA

(Axmed Maxamed Maxamuud)